

VRE - Macluumaadka bukaanka

Mid ka mid ah baaritaanada ayaa muujinaya inaad qabto bakteeriyada loo yaqaan Vancomycin Resistant Enterococci (VRE). Si fudud looguma daawayn karo antibiyootiga. Markaa inta aad isbitaalka ku jirto, waxaa jiri doona tallaabooyin gaar ah oo adiga ku khuseeya si looga hortago ku faafitaanka bukaanada kale. Waxaan rajaynaynaa in macluumaadkani ku fahamsiiyo sababta loogu baahan yahay tallaabooyinka noocan ah.

Waa maxay VRE?

Enterekoker (Enterococci) waa bakteeriyada si dabiici ah ugu jirta mindhicirka. Vancomycin waa antibiyootiko inta badan loo isticmaalo daaweynta infekshannada ka dhashay enterekoker, laakiin aan loo isticmaali karin infekshannada VRE.

VRE khatar ma tahay?

Enterekoker waxay si dabiici ah ugu jiraan mindhicirka, laakiin marar dhif ah waxay infekshan ku samayn karaan meelo kale oo jidhka ah. Maadaama ay adkaan karto in la daweyo infekshannada VRE, ma rabno inay ku faafaan isbitaallada.

Sidee ayaad ku qaadday VRE?

VRE waa bakteeriyada ku jirta mindhicirka, oo islamarkaana laga heli karo maqaarka jidhka. Bakteeriyadu waxay ku faaftaa is taabashada tooska ah ee dadka. Waxaa sidoo kale la isku qaadi karaa is taabashada aan tooska ahayn sida gacanka albaabka, badhanka nalka laga daaro, maryaha iyo meelaha la midka ee dadku wada taabto.

VRE ma la daweyn karaa?

In bakteeriyadu ay jidhka qofka ku jirto inta badan cudur ma keento. Haddii aad qaaddo infekshanka VRE, waa inaan taas ogaano oo aanu kugu daawayno antibiyootiga nooc kale ah.

Maxay sameeyaan shaqaalaha caafimaadku si ay uga hortagaan faafitaanka VRE?

Markaad joogto isbitaal, waxaad joogi doontaa qol kuu gaar ah si looga hortago qaadda bukaanada kale. Islamarkaana shaqaalaha caafimaadku waxay isticmaali doonaan qalabka la isku ilaaliyo sida galoofisyada iyo jaakad huruud ah. Waa muhiim in qof kastaa nadiifiyo gacmaha marka ay soo galayaan qolkaaga iyo marka ay ka baxayaan. Guryaha xanaanadu waxay leeyihiin nidaamyo u gaar ah VRE. Dad booqashada ku yimaada waa in lagu wargeliyo, oo ay raacaan nidaamka xarunta.

Maxaad samaynaysaa markaad guriga tagto?

- In gacmaha si wacan loo nadiifiyo iyadoo la isticmaalayo aalkolada nadiifinta gacmaha ama gacmaha lagu dhaqo saabuun iyo biyo ayaa ah waxa ugu muhiimsan ee lagaga hortagayo faafitaanka bakteeriyada. Sida kale waxaad u noolaan kartaa oo u shaqayn kartaa si caadi ah.

Sheeg inaad qabtid VRE markasta kasta oo aad tagtid ama la xiriirtid goobaha caafimaadka. Markaa waxaa la samayn karaa tallaabooyin ka hortag ah, si looga hortago faafitaanka VRE.

Kaliya xarumaha caafimaadka ayaa la sameyn doonaa tallaabooyin gaar ah oo khuseeya qofka qaba VRE.